

Agoosto 21, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston:

Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga joogtada ah iyo taageerada. Caawinaadaada, waxaan qorsheyneynay xagaaga oo dhan bilow nabadgelyo iyo guul leh sanad dugsiyeedka. Xilliga dayrta oo dhan, Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) waxay sii wadi doonaan raacitaanka isbedelka hagida caafimaadka bulshada waxayna ixtiraami doonaan doorashada qoyska sida aan u soo dhaweyno ardayda dugsiya.

Sannad dugsiyeedkeena wuxuu bilaaban doonaa si fog ee fasalada K0-12 Isniinta, Sebteembar 21-deeda. Dhamaan dugsiya ku saleysan shaqaalaha waxay ku noqon doonaan dugsiya laga bilaabo Talaadada, Sebteembar 8-deeda, si loo helo horumar xirfadeed iyo in la bilaabo gaarsiinta iyo soo dhaweynta ardayda iyo qoysaska.

Aniga iyo Duqa Magaalada Walsh waxaan dhagaysanay oo aan ka wada tashanay khubarada caafimaadka bulshada, macallimiinta iyo shaqaalaha, madaxda magaalada, waxaanna ka aruurinay jawaab celin kumanaan xubnood oo ka tirsan bulshada oo ku sugnaa daraasiin shirar aan caadi ahayn. Iyada oo la raacayo tasmadaan, BPS waxay go'aansadeen in ardayda oo dhan ay bilaabaan barashada sanad dugsiyeedka fog. Waxaan si mas'uuliyad iyo nabadgelyo leh ugu gudbi doonaa habka isku-dhafka ah ee barashada laga bilaabo Khamiista, Oktoobar 1-deeda. Qaabka isku-dhafka ayaa u oggolaanaya ardayda inay wax ku bartaan shakhsi ahaan laba maalmood usbuucii iyo inay fogaanta wax ku bartaan saddex maalmood usbuucii.

Qoysaska ardayda leh ee aan door bidin qaabka iskudhafka, oo qorsheynaya inay wax ku bartaan meel fog shan maalmood usbuucii, ma waayi doonaan booskooda.

Dhamaan kadib markay ardaydu bilaabaan barashada fog bisha Sebteembar 21, wejiyada loogu tala galay isu gudubka barashada shaqsiya ah ayaa hoos ku taxan. Labada taariikho ayaa matalaya maalmaha ugu horreeya ee ardayda ee Kooxda A iyo Kooxda B. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan shaqooyinkan ayaa lala wadaagi doonaa usbuucyada soo socda.

Khamiista, Oktoobar 1: Ardayda leh baahida sare

Khamiista, Oktoobar 15 (B) & Isniin, Oktoobar 19 (A): Fasalada K0, K1, K2

Khamiista, Oktoobar 22 (B) & Isniin, Oktoobar 26 (A): Fasalada 1 - 3

Khamiista, Nofeembar 5 (B) & Isniin, Nofeembar 9 (A): Fasalada 4 - 8 (bilaawga fasalada dugsiyada sare 6 - 8)

Isniin, Nofeembar 16 (A) & Khamiista, Nofeembar 19 (B): Fasalada 9 - 12

Waxaan fahamsanahay in duruufaha qoysku isu beddelaan; sidaas darteed, qoysasku waxay codsan karaan isbedel ku yimaada doorbidkooda bilowga ah ee lagu xushay foomkeena ugu dambeeyay, oo loo diray qoysaska Ogoosto 19-keeda. Isniinta, Agoosto 24-ta, BPS waxay

bilaabi doonaan wicitaanno loogu talagalay qoysaska aan dhammaystirin ama laga yaabo inay helin foomka si ay uga kaalmeeyaan dhammaystirka. Waxaan sidoo kale e-mayl u diri doonnaa qoysaska oo dhan si aan u xaqiijino xulashadooda, oo mar dambe waxaan bixin doonnaa jadwal dugsiga iyo macluumaadka gaadiidka baska jaalaha ah, hadba sida ku habboon.

Macluumaad dheeri ah ku saabsan qaababka barashada, iyo sidoo kale qabyo-qoraalkii ugu dambeeyay ee qorshaheenna dib u furitaanka, fadlan booqo bostonpublicschools.org/reopening. Haddii aad haayso wax su'aalo ah, fadlan la xiriir reopening@bostonpublicschools.org.

Waxaan sii wadi doonnaa inaan siinno warbixino qoysaska usbuucyada xiga. Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga joogtada ah maadaama aan xoogga saareyno dadaalkeenna oo dhan si aan u hubinno sannad barasho badbaado iyo caafimaad leh.

Qaabka ugu wanaagsan ee aan dhammaanteen nabadgelyadeenna u ilaalin karno oo carruurteenna ku soo celinno dugsiga ayaa ah dhammaanteen inaan qabanno qaybteena annagoo xidhan gafuur saarka, ilaalinta fogaansho lix dhudhun midba midka kale, inaan ka fogaano dadka badan, guriga iska joogo markii aadan ahayn. dareem wanaagsan, iyo gacmaheena oo aan dhaqno marwalba. Anaga oo raacayna tilmaamahan caafimaad, kaliya ma ilaalin doonno nafteena iyo qoysaskeena, waxaan sidoo kale caawin doonnaa beesheena, oo aan iskuuladayaga ka ilaalinaynaa badbaado carruurteenna.

Waad ku mahadsan tahay iskaashiga iyo dulqaadkaaga,



Dr. Brenda Cassellius
Kormeeraha guud